# Kacbada Sharfan




## Kacbada

Waa dhismo afar gees ah ee kaga yaal dhexda masjidka xaramka ee Makkah Al-Mukarramah, waana qiblada ay u jeestaan Muslimiinta waqtiga salaadda iyo qeyrkeed cibaadooyinka uu amray Allaah .

## Dhismaha Kacbada:

Waxaa dhisay Ibraahiim Al-Khakiil iyo wiilkiisa Ismaciil c.s. amar kaga yimid xagga Allaah cazza wajalla darti, haddana waxaa la cusoobooneysiiyey dhismaheeda dhowr jeer. Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri: “Oo (xusuusta) markuu Ibraahiim kor u qaadayey aasaaska Beydka iyo Ismaaciilba (iyagoo leh): Rabbiyow! Naga aqbal, hubaal Waxaad Adigu tahay Maqlaha wax kasta ee wax kasta Ogsoon” (Al-Baqarah: 127) Wuxuuna Nabiga s.c.w. kala qayb galay qabaa’ishii Makkah dhigidda dhagaxa madow halkiisii la dhigay kolkay dib u dhisayeen Kacbada.




## Intay isu jiraan tiirarkeeda:

5 Laga billaabo tiirka dhagaxa madow ilaa tiir shaameedka waa 11.68 mitir, waxaana ku jira albaabka Kacbada.
6 Laga billaabo tiir Yamaneedka ilaa tiir galbeedka waa 12.4mitir
7Laga billaabo tiirka dhagaxa madow ilaa tiir Yamaneedka waa 10.18 mitir
8 Laga billaabo tiir Shaameedka ilaa tiir galbeedka xiga waa 9.90 mitir

## Dhismaha Kacbada waayo kala duwan




### Dhismihii Nabiga Alle Ibraahiim c.s.

Wuxuu ahaa hab dherer ah, leh labo albaab oo ku qabsan dhulka.




### Dhismihii Quraysh Islaamka ka hor

kaddib markuu ku yaraaday maalka, waxaana ka muuqda xijirka oo ah qayb ka mid ah Kacbada.




### Dhismihii Saxaabiga weyn ee Cabdullaahi bin Az-Zubayr a.k.r.

isagoo fulinaya sida uu ku arrimiyey Rasuulka Alle s.c.w. markuu Caa’isha a.k.r. ku yiri: “Haddii aanay dadkaada aheen kuwo dhowaan ka soo baxay jaahiliyaddii oo ku cusub Islaamka, waxaan dib ugu dhisi lahaa Kacbada aasaasyadii Ibraahiim” (Al-Bukhaari 1586)



### Waxaa dib loo dhisay kaddib Cabdullaah bin Az-Zubayr a.k.r.

waqtigii dawladdii umuwiga iyagoo u dhisay sida ay Quryash u dhistay.



### Kacbada sida ay tahay maanta Allaaha sharfee



## Tiir Yamaneedka

Waa tiirka Kacbada sharfan ee xagga koonfur galbeed ah kaasoo ka soo horreeya dhagaxa madow marka la dawaafayo. Waxaana loogu magac daray tiir Yamaneed waayo wuxuu u jeedaa midigta ama xagga Yaman.. wuxuu kaga duwan yahay tiir Yamaneedka tiirarka kale inuu ku taagan yahay aasaasyadii hore ee beytka ay kor u qaadeen Ibraahiim iyo Ismaaciil c.s., waxaana sunno ah in la taabto oo gacanta la mariyo dhunkasho la’aan. Haddii ayan kuu suura galin taabashada iyo gacan marinta tiir Yamaneedka waa la isaga gudbaa adigoo ku tilmaamin gacanta oo aan takbiirsan. Waxaana ka sugnaaday Nabiga s.c.w. markuu dawaafayo inuu taabto oo gacanta ku qabto dhagaxa madow iyo tiir Yamaneedka, waxaana soo arooray qofka ku dawaafaya kacbada inuu tiirkan iyo tiirka dhagaxa madow dhexdooda la yimaado ducadan: “Rabbiyow! Nagu sii wanaag adduunka, iyo wanaag Aakhirada, oo naga badbaadi cadaabka Naarta” (Al-Baqarah: 201)

## Albaabka kacbada

Qaabka albaabka Kacbada iyo inta uu le’eg yahay wuxuu ahaa mid kala duwan casriyadii iyo taariikhihii la soo maray. Albaabka Kacbada maanta wuxuu ka kor yahay dhulka ku dhowaad 2.5. mitir, dhererka albaabkana waa 318 cm, ballaciisuna waa 171cm, hoosna wuxuu gaaraa nus mitir ku dhowaad, wuxuuna ka sameysan yahay albaabka kacbadda dahab soocan, wuxuuna le’eg dahabka loo isticmaalay 280 kiilo garaan dhowris iyo daryeel ahaan Kacbada.

## Furayaasha Kacbada

Quraysh waxay u xil saartay reer Cabdi Daar oo ka tirsan Quraysh sharafta heynta furayaasha Kacbada, markiina la furay Makkah , waxaa soo degey qowlka Alle kor ahaaye: “Hubaal, Allaah wuxuu idin amraa inaad siisaan ammaanooyinka cidda iska leh” (An-Nisaa: 58) Markaasuu Nabigu s.c.w. u yeeray Cuthmaan bin Dalxah oo u dhiibay furihii Kacbada, kaddib wuxuu u wareegey xilka heynta furayaasha Kacbada ina adeerki Shayba, ilaa maantana waxaa haya furayaasha Kacbada reer Shaybah tixgelin dardaaranka Nabiga s.c.w., waxayna isku raaceen ilmo Shaybah inuu hayo furaha kooda ugu da’ weyn.

## Dhagaxa Madow

Dhagaxa madow waa dhagax wanaagsan ka soo degey jannada, wuxuu kaga yaal gees kacbada sharfan, sida uu Nabigu s.c.w. yiri: “Dhagaxa madow wuxuu ka soo degey jannada isagoo ka cad caanaha, markaasaa waxaa madoobeeyey dunuubta aadmiga” (At-Tirmidi 877), dhagaxa madowna sida muuqata maanta midabkiisu waa madow xiga casaan, wuxuuna ku yaal tiirka koonfureed, wuxuu ka sarreeya dhulka lagu dawaafo wax in yar ka badan hal mitir. Wuuna jabjabay dhagaxa madow casriyadii soo maray iyo dhacdooyinkii taariikh darteed, mana aha wax walba oo ku guda jira koorka qalinka ah wax ka mid ah dhagaxa madow, bal waxaa ah tiro jajabkaas ah mid walba oo ka mid ah wuxuu le’eg yahay xabbad timir ah, waxaa ku hareersan oo xafida cajiin madow.

Waxaana sunno marka la ag marayo seddex arrimood hadba middii kuu fududaato adigoo u kala hormarinaya sidan soo socota oo mudnaanta u kala siinaya:
1. Inaad dhunkato adigoo oranaya Allaahu Akbar. Haddii aadan awoodin
2. Inaad mariso oo ku masaxdo gacanta adigoo oranaya Allaahu akbar, haddii aadan awoodin
3. Inaad ku tilmaanto gacanta adigoo oranaya Allaahu Akbar.

## Al-Multazam

Gaadda saarka waa hab ka mid ah hababka ducada oo ka sugnaatay qaar ka mid ah saxaabada, waana inuu qofka duceysanaya ku dhejiyo laabtiisa iyo gacmahiisa iyo dhabankiisa gidaarka Kacbada, markaas ku duceysto wuxuu doono.
**Meesha uu ku yaal:** Halka ugu mudan in la qabsado waa inta u dhexeysa dhagaxa madow iyo albaabka, waana sida uu yiri Ibnu Cabbaas a.k.r. , waxaa qofka u bannaan inuu qabsado oo gaaddada saari qeyrkeed ee ka mid ah jihooyinka Kacbada, dhammaan intaaba way ka sugnaadeen horraankii suubbanaa.
**Waqtiga lala yimaado:** waxaa lala iman karaa marka ugu horreysa uu xaajiga ama cumreystaha yimaado Kacbada, ama marka uu tagayo, waqtigii uu doono, mana jiro duco gaar oo lagu duceysto marka la joogo halkaa, ee wuxuu qofku ku duceysan karaa wixii uu doono oo khayr adduun ah iyo aakhiro, waase inuusan dadka ciriiryin oo dhib ugu geysan si uu halkaa ugu duceysto.



## Maqaamu Ibraahiim


Waa dhagaxii uu ku istaagnaa aabbaha anbiyada Ibraahiim c.s. si uu u dhiso Kacbada, waxaana u dhigay Ismaaciil c.s. si uu ugu istaago, isagoo kor ugu qaadayo dhagaxyada Kacbada, markaasaa waxaa ku dhigmay raadkii labadiisa caagood, dhagaxaana wuxuu ku dhegganaa derbiga Kacbada ilaa waqitgii uu talada hayey amiirkii mu’miniinta Cumar bin al-Khaddaab a.k.r., isagoo ka soo durkiyey beytka dhowr mitir si uusan u mashquulin dadka tukanaya iyo kuwa ku dawaafaya beytka hareerahiisa, welina raadka cagtii Ibraahiim Al-Khaliil wuu ka muuqdaa dhagaxa korkiisa ilaa imminka.
**Meeqaankiisa:** Maqaamka Ibraahiim wuxuu leeyahay meeqaan weyn, waayo waa mid ka mid ah muuqaallada xaramka ee muuqda, wuxuuna caddeyn u yahay isku xirnaanta dhambaallada anbiyada iyo inay isku ujeeddo yihiin casriyada oo dhan, eega Ibraahiim c.s. aabbaha anbiyada wuxuu dhisay Kacbada, innaguna waa ku cibaadeysannaa maanta, u hoggaansan ahaan baaqiisa uu dadka ugu baaqay xajka, waxaynuna aragnaa raadadka dhismaha uu sameeyey iyo calaamadaha cagahiisa,siduu Allaah Kor ahaaye yiri: “Waxaa ku dhex yaal calaamooyin cad (sida) maqaamkii Ibraahiim” (Aali-Cimraan: 97)
**Waxa naloo sharciyeey marka aynu joogno Maqaamu Ibraahiim agti:** waxaa la sharciyeey qofka ku dawaafaya Kacbada inuu ku tukada sunnada dawaafka maqaamu Ibraahiim gadaashi, ama jihadiisa meel ka gadaale hadday u fududaato, Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri: “Oo ka dhigta meel lagu tukado maqaamkii Ibraahiim” (Al-Baqarah: 125) laakiin marka uu ciriiri jiro waxaa waajib ah in lagu kaalmeeyo dadka dawaafaya dawaafkooda oo aan dhib loogu geysan in lagu tukado halka ay soo marayaan, salaaddana waa aqbal halkii lagu tukadaba.

## Miizaabka

Miizaabka Kacbada sharfan waa qaybta ah dusha Kacbada xagga waqooyi ee socda ilaa iyo xijirka, ee socodsiiya biyaha ku soo urura kacbada dusheeda oo u duwa xagga xijirka Kacbada marka uu roob da’o ama la meyro duleedyada Kacbada.

## Xijirka (Al-Xadiim)

Waa derbi wareegsan oo goobo barkeed ah oo ku yaal waqooyiga Kacbada Sharfan, waana qayb ka mid ah Kacbada.
**Qisada Xijirka:** Kacbada markii hore waxay ku taagnayd aasaasyadii Ibraahiim uu dhisay u socota xagga waqooyiga hab dherer ah, markii ay Quraysh dooneen inay dib u dhisaan Kacbada, waxay isku soo dareen lacagtii lagu dhisi lahaa, waxaase ku yaraaday maalka xalaalka ah, oo kuma filnaan dhismaha Kacbada, mana ayan dooneyn inay ku dhisaan Kacbada maal uu kuu dheehmay xaaraan, markaasay waxay yiraahdeen aan dhisno inta uu noo deeqo maalka xalaasha inta kalena aan ka yeelno bannaan , markaas baan ku xireynaa derbi si uusan qofna ugu dawaafin derbigaa kaddib. Derbi kastana ka mid ma aha Kacbada, waayo gidaarka Kacbada wuxuu ka soo billowdaa dhexda goobada ka soo billowda gidaarka xijirka gudahi ilaa gidaarka Kacbada debeddda ah ku dhowaad siddeed mitir iyo bar, laakiin qaddarka Kacbada ka mid ah waa toddobo dhudhun ama wax ka yar shan mitir ku dhowaad.
**Ku tukashada Xijirka:** Waxaa sunno ah in lagu tukado salaad sunno ah xijirka gudahi, arrinkaasina xaqiiq waa ku tukasho gudaha Kacbada sharfan. Markay doontay Caa’isha a.k.r. inay gasho gudaha Kacbada oo ku tukato salaad, Nabigu s.c.w. wuxuu ku yiri: Ku tuko xijirka haddii aad doonto inaad gasho Kacbada, waayo waa qayb ka mid ah Kacbada”. (Abuu Daawuud 2028)



## Kiswada (marada) Kacbada

Waxaa la huwiyey Kacbada maryo kuwo ugu wanaagsan islaamka ka hor, waxayna madaxda islaamka isaga dambeeyeen in la huwiyo intaa kaddib midabyo kala duwan, hu’ga kacbadana maanta wuxuu ka sameysan yahay xariir madow oo soocan oo lagu naqshadeeyey aayado Qur’aan iyo ducooyin midabka dahabka ah, wuxuuna halkii maro qaataa 670 kgm oo xariir dabiici ah, wuxuuna gaaraa ballaca marada 658 mitir oo afar gees ah.

## Shaadirwaan

Waa dhismo ku hareersan hoos gidaarka Kacbada oo hab janjeer ah si loo xoojiyo, mana lagu dawaafi karo, waayo waa qayb ka mid ah Kacbada sida ay qabaan culimo badan.

لمشاهدة المزيد

INFOGRAPHIC ISLAM

www.infographislam.com

Waxaa isku duway oo fuliyey

MODERN GUIDE

Shirkadda Ad-Daliil Al-Mucaasir